



Qalalaasaha Qoyska iyo Guriga

Australiya gudaheeda, qalalaasaha qoyska iyo guriga lama aqbali doono.

Qalalaasaha qoyska iyo guriga waa dembiyo ka soo horjeeda sharciga.

Qofka gala dembiyadaan wuxuu geli karaa xabsi, kii uu yahayba nin ama naag.

Haddii adiga ama qof aad taqaan uu khatar ku jiro ka wac boliiska **000**.

Boliiska Australiya waa ammaan waana lagu kalsoonaan karaa.

Wixii ah macluumaad iyo la talin qarsoon oo bilaash ah ka wac **1800 RESPECT 1800 737 732**.

Haddii aad u baahan tahay turjumaan bilaash ah wac **131 450**.

Dawlada Australia (Australian Government) uma dulqaadato qalalaasaha qoyska iyo guriga xaalad kasta oo ay tahay.

Qalalaasaha qoyska iyo guriga waxaa ka mid ah hanjabaad ama dabeecad qasadkeedu yahay xukumida lammaanaha ragga ah ama dumarka iyadoo la sababayo cabsi iyo hanjabaada ammaankooda. Qalalaasaha qoyska iyo guriga waxaa ka mid ah:

- wax ku dhufashada;
- ceejinta;
- u diidida lacag lagama maarmaan ah lammaanaha ama qoyska;
- ka takoorida lammaanaha qoyska iyo saaxiibada;
- caayida ama si joogtaha u eedeynta lammaanaha; iyo
- u hanjibida carruurta ama xayawaanka la korsodo.

Dumarku waxay leeyihiin xuquuq la mid ah ta ragga.

Shuruucda Australiya waxay ula dhaqmaan dumarka iyo ragga si siman.

Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu u noolaado si xor ka ah qalalaasaha, ee xiriirka farxada leh iyo bulshadaba.

Dumarku inay aqbalaan ma aha in loola dhaqmo si xun ama la waxyeeleeyo.

Waxaa jira adeegyo dhaqan ahaan xasaasi ah Australiya gudaheeda oo ku caawin kara.

1800 RESPECT waa adeega La talinta Qalalaasaha Qoyska iy Qoyska Waxyeellada Galmada Qaranka ee Australia (Australia's National Sexual Assault, Family and Domestic Violence Counselling service). Waxay bixisaa macluumaad iyo la talin interneetka ah iyo taleefanka oo qarsoon bilaashna ah. La taliyayaasha way ku dhageysan doonaan, su' aalaha ayey ka jawaabi doonaan waxayna kuu gudbin karaan adeegyada kale ee taageerada ee xaafadaada.

Ka wac **1800 737 732** ama gal Bogga Interneetka 1800 RESPECT ah www.1800RESPECT.org.au.

Ma u baahan tahay turjumaan?

Ka wac Adeega Turjumaada qoraalka iyo Afka (**Translating and Interpreting Service (TIS)**) bilaash ahaan **131 450**. TIS ayaa kaa caawin karta si aad ula hadasho adeegyada kale. TIS ma bixiso la tallin.